

Su`aalaha Inta badan la Isweydiiyo ee ku saabsan Miisaaniyada Magaalada Bloomington

1. Maxay magaaladu ka samaysay arrimaha hoos u dhigista shaqaalaha, dhimista mushaaraadka, ama saacadaha shaqada ee la yareeyay? Tusaale, ma laga fakaray hoos u dhigista mushaharka 10%?

- Shaqaalaha magaalada ayaa mar horaba laga jaray 6 shaqo oo buuxda iyo 2 shaqo oo nus ah miisaaniyada 2021. Gudigga Talo Bixinta Miisaaniyada ee Bulshada ayaa qiimaynaaya yarayn dheeraad ah oo lagu sameeyo shaqaalaha taasoo yaraynaysa ilaa 28.5 boosaska shaqada buuxda iyo kuwa nuska ah.
- Maadaama shaqooyinka magaaladu aad u badan yihiin, ma jiro shaqo dhimis "hal heer wada ah dhammaan" oo macno samayn karta. Mushaharka waxaa lagu saleeyaa darajada shaqada qofka – mushaharka injineerada dhismaha ayaa isku badalaysa si ka duwan mushaharka kaaliyayahasha maamulka, taasoo isku badalaysa si ka duwan mushaarka ciidanka booliiska.
- Dakhliyada kasoo xarooda hudheelada ayaan la filayn inay kusoo laabtaan heerarkii la rabay ilaa 2025. Magaaladu waxay u baahan tahay inay hadda go'aano gaarto si ay iskugu dheeli tirtro miisaaniyada labada miisaaniyad sanadeedka 2021, laakiin sidoo kale sanadaha soo socda. Mushahar yarayntu maaha wax abidiyan ku jiri doona miisaaniyada Magaalada.
- Magaalooyinka kale ee aan ku tiirsanayn dakhliyada hudheelladu ma kordhinayaan qarashaadka nololaha sanadka soo socda. Shaqaalaha wanaagsan waxay haystaan dookhyo ku aadan meesha ay ka shaqaynayaan, mushahar yarayntuna waxay keenaysaa in shaqaalaha wanaagsan ay shaqo kale oo ka mushaar badan raadsadaan.
- Sharciga sinaanta mushaharka ee gobalka ayaa ka doonaaya magaalooyinka inay lahaadaan nidaamka qiimaynta shaqada iyo hanaanka mushaharka. Shaqooyinka waxaa loo kala qaybiyaa si waafaqsan qiimaynta kadibna waxaa la siiyaa shaqaalaha mushahar ay u qalmaan.
- Magaalada Bloomington waxay leedahay shan urur oo midawga shaqaalaha ah, kuwaas oo ka doonaaya magaalada inay raacdo xeerarka waawayn, nidaamyada, iyo sharciyada hagaaya xidhiidhaha shaqaalaha iyo mushaharka, si wayna u yaraynaaya awooda magaalada ee soo rogista shuruudaha iyo xeerarka shaqada ayadoon wada hadal la gelin ururada. Magaalooyinka waxaa sidoo kale waajib ku ah inay ka qaybgalaan shirarka dhex dhexaadinta ee ay la yeeshaan midawiyada shaqaalaha ee matalaaya shaqaalaha muhiimka ah ee, sida lagu qeexay sharciga xidhiidhaha shaqaalaha, loo ogolayn inay shaqo joojin sameeyaan. Magaalada Bloomington, shan ka mid ah ururada midawga waxaa leh kooxaha shaqaalaha oo xaq u leh inay galaan dhex dhexaadin xal raadin ah. Tani waxay ka dhigan tahay in qolo sadexaad oo madax banaan ay go'aamiso waxyaabaha looga hadlaayo dhex dhexaadinta haddii dhinacyadu ay heshiin waayaan. Dhex dhexaadiyaashu waxay caadiyan leeyihiin qaab sadex geesood ah si loo sameeyo go'aamintooda: (1) isbarbarshigyada caadisyada banaanka ee suuqa; (2) sinaanta gudaha ee kooxaha shaqaalaha Magaalada; iyo (3) awooda bixinta mushaharka ee loo shaqeeyaha. "Suuqa" ay dhexdhexaadiyaashu ka fiirsanayaan ayaa caadiyan ah magaalooyinka kale ee aaga bartamaha oo la xajmi ah magaalada. Xogta aan ka hayno magaalooyinka waawayn, ee hormarsan ayaa muujinaysa inay qorshaynayaan inay sii wadaan kordhinta qarashaadka biilka ee shaqaalaha sanadka


2021. Tani waxay badanaa qusaysaa xaqiiqada ah in miisaaniyadooda shaqadu aysan ku tiirsanayn hudheelada iyo canshuuraha diiwaan gelinta si lamid ah sida miisaaniyada magaalada Bloomington ugu tiirsan tahay sidaas awgeedna aysan waajahayn isla caqabadaha aan waajahayno. Waxaan guul ka gaarnay wadahal ku aadan yaraynta mushaharka sanadka 2021 oon la gaarnay hal urur shaqaale, waxaana aaminsanahay in kooxaha kale ee aan wali heshiisyada nala gaarin ay aqbali doonaan isla heshiiska. Mushahar dhimistaan waxaa sidoo kale la waafajin doonaa shaqaalaha aan midoowyada ku jirin, sidoo kale.

2. Maxay magaaladu ka qabanaysaa yaraynta qarashka baxa ayadoo tashiilaysa waxay haysato halkii ay ka kordhin lahayd canshuuraha?

- Si aan wax uga qabano hoos u dhaca ku yimid miisaaniyada 2020 sabab la xidhiidha COVID-19, Magaaladu waxay yaraysay boosaska shaqaalaha, waxay dib u dhigtay qorista shaqaale cusub, waxay hakisay mashruucyada maal gelinta, waxay yaraysay qarashaadka adeegyada iyo agabka la qorsheeyay, waxayna si taxadar leh u qiimaysay shaqooyinka si ay u samayso tashiil iyo hoos u dhigis dheeraad ah. Dawlada Hoose ayaa magacaawday Gudigga Talo Bixinta Miisaaniyada ee Bulshada bishii Maayo 2020 si loo abuuro qaybaha miisaaniyada 2021 kuwaasoo muhiimada siinaaya dookhyada hoos u dhigista adeegyada taasoo ay u jiraan fikrado lagasoo aruurshay bulshada oo ku aadan waxyaabaha ugu muhiimsan.

3. Magaaladu ma ka fakartay ilaha kale ee dakhliga si loo xaliyo dhibaataada hoos u dhaca miisaaniyada? Tusaale ahaan, adeegsiga canshuurta khamriga, lacagaha barnaamijka ama lacagaha kirada halkii laga adeegsan lahaa canshuuraha guryaha.

- Canshuuraha guryaha ayaa caadiyan ah 68% boqolkiiba dakhliga lagu taageero miisaaniyada Maalgelinta Guud. Ilaha kale ee dakhliga waxaa ku jira qarashaadka ruqsad bixinta, qarashaadka shatiyada, dakhliyada deeqaha, lacagaha barnaamijyadu qaadaan, iyo canshuuraha hudheelada iyo diiwaan gelinta. Dakhliga hudheelada iyo diiwaan gelinta ayaa caadiyan soo saara 13% dakhliga guud ee magaalada. Aafada cudurka awgeed, dakhliyadaan waxay hoos u dhaceen wax ka badan \$5 milyan, waana wax ka yar nus cadadka ay ahaayeen kahor aafada COVID-19.
- Gudigu waxay eegeen qarashaadka barnaamijyada waxayna ku talinayaan in qarashaadka qaar la kordhiyo. Tartanka ayaa magaalada ka hortaagan inay samayso qarash kordhin badan – tusaale, dadka dheela kubada goolafka waxay leeyihiin dookhyo ku aadan meesha ay doonayaan inay ku dheelaan.



4. Dib ma loo dhigi karaa mashruucyada sida dayactirka magaalada ama dhisida xarun cusub oo bulsho?

- Sanadka 2020, mashruucyo kaladuwan oo dhismaha iyo maal gelinta ah ayaa dib loo dhigay. Tusaale barnaamijka dayactirka darafyada wadooyinka ayaa la joojiyay sanadka 2020. Magaaladu hadda kama shaqaynayso wax qorsheyaal ah si loo badalo Creekside, ayna ku jiraan goobta ama naqshada xarun cusub oo bulsho.
- Dhaqaale xumada noocan oo kale ah ayaa fursad u noqon kara in magaaladu ka faa'iidaysato lacagteeda mashruuca. Tani waxay dhacday kadib masiibadii 9/11, markaas oo magaaladu meelaha qaar kaydisay lacag dhan 10-15% mashruucyada.

5. Maxay magaaladu ugu tiirsan tahay si wayn ganacsiyada hudheelada?

- Goobta ay Bloomington waa bartamaha, oo leh wadooyinka waawayn ee caanka ah waxaana u dhaw garoonka diyaaraha, taasoo ka dhigaysa meel dabiiciyan ku haboon ganacsiyada hudheelada. Magaaladu waxay tobonaan sano ku shaqaynaysay adeegsiga qaybahaan si ay uga faa'iidaysato. Natiijada ayaa ah ganacsiga balaaran, ee kobaca samaynaaya ee hudheelada oo leh heer ganacsi qaran oo adag. Waxay shaqaalaysiisaa dadka dagan Bloomington waxayna soo saartaa dakhliga canshuurta hudheelada kaasoo yareeya canshuuraha guryaha ee Bloomington ku dhawaad 10%. Hoos u dhaca aafada cudurku keentay ee ku dhacay dakhliga canshuurta hudheelada ayaa kaliya muujinaysa sida ganacsigaan nooga caawiyo yaraynta canshuuraha guryaha. Waa wax xanuun badan in la arko saamaynta mudada dhaw aafadu ku leedahay shaqooyinka hudheelada, laakiin khabarada qiimeeya ganacsiga ayaa filaa inay soo kabtaan sadex ilaa shan sano kadib. Maaha kaliya Bloomington waxa la fajacsan fikradaha mudada fog ee ganacsiga hudheelada. Magaalooyinka ku yaala dhammaan aagaga bartamaha ayaa aad ugu shaqaynaaya inay kordhiyaan hudheelada si ay u helaan faa'iidooyinka ay Bloomington helaysey tobonaan sano.